



SAID SADIQ ABDULLAHI

Musharrax xildhibaan Baarlamaanka Puntland



AJANDE SIYAASADEED

Ajandahayga Degmada Gaalkacyo

 Amniga - Degmada Gaalkacyo iyo dadkeedu waxa ay muddo la daalaa-dhacayeen colaado beelaysan oo kala dhexeeyay beelaha dariska ah; iyo dhanka kale oo argagixisadu ay ku bartilmaameedsan jireen haldoorkooda. Colaadahaasi waxa ay la hareen reer Gaalkacyo, iyaga oo ka reebay tartankii ay kula jireen degmooyinka kale iyo dadka dhiggooda ah. Waxa ay colaadahaasi bulshada iyo deegaankaba u curyaamiyeen dhaqaale ahaan, dad ahaan, aqoon ahaan, iyo dhinac kasta oo ay ka kobci lahaayeen.

Waxa ay bulshadu ahayd kuwo uu mugdi ku hareeraysan yahay, kuwo rajo dhigay, kuwo dhallinyaradoodu aysan fursad helin, kuwo ganacsatadooda marna la ugaarsado marna la baado, kuwo haldoorkoodu degmada isaga cararo markii ay fursad iyo amniba ka waayeen, kuwo aan xasuusnayn tagtada, cabsi ka qaba taaganta, wax rejo ahna aan ka qabin timaaddada.

Dad kooban oo geesiyyiin ah, iyo dawlad garab taagan ayaa u kacay arrinkaas. Dad kooban ayaa diiday gunnimada, gobonnimadana af iyo addin ku raadiiyay.

Ugu dambayn reer Gaalkacyo waa ay guulaysteen. Waxa ay guul ka gaareen colaadihiib beelaha dariskooda ah, iyo ugaarsigii argagixisada. Waxa ay u soo noqdeen gobonnimadii ay asalka iyo faraca u lahaayeen. Isku duubnida dadka reer Gaalkacyo, iyo muddadii yarayd ee ay amniga haysteen, waxa ay si togan u saameysay dhammaan dhulka Puntland, dhulka Soomaaliyeed, iyo Bariga Afrika oo dhan.

Kartida, aqoonta, iyo isku duubnida reer Gaalkacyo, waxa ay abuurtay mucjisadii ugu waynayd ee Afrika ka dhacda, iyada oo bulsho isku tagtay ay aasaastay dekad ka mug iyo meeqaam wayn dekedaha dalalka dunida 1aad.

Dadka degmada Gaalkacyo, waxa ay heleen magacii iyo meeqaamkii ay xaqa u lahaayeen; balse waayahaan danbe waxaad mooddaa in ay dib ugu noqonayaan halkii laga yimid intii horey loo socon lahaa.

Muddooyinkii u dambeeyay degmada Gaalkacyo iyo deegaanada ku hareeraysan, waxaa ka socda dilal sokeeye oo ku salaysan dhaqammo jaahili ah. Waxaa jira ugaarsi iyo aano qabiil oo beelo walaalo ah ay isku geysanayaan. Waxaa ka socda dilal aan xurmeynayn deegaannimo, ehefnimo, iyo muslimnimo toona. Dilka iyo dhiigga Gaalkacyo ku dhex qubanaya, gacanta gaysanaysa kama imaan bannaanka, ee waxa ay ka timid gudaha. Beelo walaalo ah, isku dhiig iyo isku dheecaan ah, ayaa isku dilaya waxyaabo aan micno sii ridan lahayn, iyo feker gurracan. Dadkiin ka adkaaday cadowgooda, ayaa maanta iska adkaan la', isqabsan la', heshiin la'.

Ajandahayga siyaasadeed ee degmada Gaalkacyo, waxa uu salka ku hayaa in aan guntiga u xirto, oo dedaal kasta aan ku bixiyo sidii aysan dib danbe u dhici lahayn dhiig sokeeye oo Gaalkacyo iyo gobolka oo dhan ku daata.

Waxa aan naf iyo maalba u hurayaa sidii aan iskugu keeni lahaa; koofiyadaha beelaha xurguftu ka dhexeyso, siyaasiyiintooda, iyo haldooradooda - si xal kama dambays ah looga gaaro colaadaha soo noqnoqday.

Sidoo kale waxa aan ku dadaalayaan ka xubin baarlamaan ahaan, in la soo saaro xeer qabiillada ku wajahan oo waafaqsan shuruucda dawladda Puntland, diinteen Islaamka, iyo dhaqankeenna suubban - kaas oo ciqaab adag ku fulinaya qof kasta oo feker qabiileed ku daadiya dhiig sokeeye - waxaan sidoo kale ku dadaalayaan in sharcigaas isaga oo loo dhan yahay meel fagaare ah oo daahfuran lagu meel mariyo, Soomaali wayn oo idilna ay markhaati ka noqoto.



SAID SADIK ABDULLAHI

Musharax xildhibaan baarlamaanka puntland



 **Waxa aan ku dedaalaya in degmada iyo gobolka aan metelayo ay helaan xuquuqaha kala duwan iyo adeegbixinta dawladda ee xaqa loogu leeyahay golaha fulinta ee wasaaradaha iyo madaxtooyada. Waxa aan dadaal galinaya in ay degmada iyo gobolkuba helaan xuquuqdoodii waxbarasho, caafimaad, amni, ganacsi, maamul, shaqaalaysiin, iyo kaabayaal dhaqaale.**

 **Waxa aan dadaal kasta ku bixinaya ka qayb qaadashada arrimaha bulshada. Waxa aan metelaadayda muujinaya xilliyada abaarahi iyo xilliyada barwaqaqada, xiliyada colaadaha iyo xilliyada nabadda, xilliyada xafladaha bulshada sida tartamada isboortiska, xuska ciidaha, iyo kuwa maalmaha qaranka.**

Ajandahayga Gobolka Mudug

 **Hufnaan iyo metelaad;**

Waxa aan si hoose indhaha ugu haynaya maamulka heer gobol iyo heer degmo ee aan ku metelo Golaha Wakiillada Puntland, waxa aan soo dhicinaya xaq kasta oo aan ku lahayn ka gobol ahaan dawladda PL, mida Soomaaliya, urrurada caalamiga ah, iyo kuwa maxalliga ahba. Waxa aan xildhibaannada golaha deegaanka ee degmooyinka ku dhiirri gelinaya in ay la xisaabtamaan maamulka iyaga ka sarreeya, si loo helo maamul heerar kala duwan leh oo ay bulshadu ku kalsoonaan karto.

 **Qoondada siyaasadeed;**

Gobolka Mudug waa gobolka 3aad ee ugu wayn 18-ka gobol ee Soomaaliyadii hore, waxa aan aaminsanahay in uu u qalmo degmooyin ka badan inta uu haysto. Kororka degmooyinku waxa uu kordhiyaa maqaamka gobolka iyo qoondada siyaasadeed ee uu helayo, sidaas awgeed waxa aan ku dadaalaya in aan meel mariyo sharciyadda kordhinta degmooyinka gobolka Mudug - sida uu ii ogol yahay dastuurka dawladda Puntland qodobka 48aad, xubinta 2aad, farqaddisa B, aniga oo miiska saaraya doodda ah in degmooyin laga dhigo deegaanada ay kamidka yihiin; Bacaadwayn, Beyra, Balibusel, Turdibi, iyo Garacad, oo intuba bulsho ahaan, istiraatijiyyad ahaan, iyo taariikh ahaanba u qalma in ay degmooyin noqdaan.



SAID SADIK ABDULLAHI
MUSHARAX XILDHIBAAN BAARLAMAANKA PUNTLAND





Dhanka Dhaqaalaha:

- **Gobolka Mudug waxa uu nasiib u yeeshay in uu helo kaabayaal dhaqaale oo isugu jira deked qallalan (Turdibi) ideked badeed (Garacad), iyo kastanka koonfureed, kuwaas oo furay suuq ballaaran oo keeni kara dhaqaale xooggan oo ay dadka iyo dalkuba ka faa'iidaysan karaan. Aniga oo ka faa'idaysanaya awooddanya xildhibaannimo ee dastuuriga ah, middayda u dhalashada Gobolka Mudug, iyo xirfadahayga kale ee shakhsiga ah - waxa aan ku dadaalayaa in dadkayga iyo dalkaygaba aan uga faaiideeyo fursadaha dhaqaale ee ku jira suuqan. Waxa aan ku dedaalayaa yaraynta ajaaniibta kalluumaysiga ka samaysa xeebaha Puntland, aniga oo isla markaasna awood siinaya kaluumaysatada Puntland, oo ku xiraya suuqyo caalami ah oo ay u dhoofiyaan kalluunka ay soo dabteen, iyo sidoo kale in ay ka iibin karaan kalluumaysatada ajaaniibta ahaa ee aynu ka xanibnay kalluumaysiga xeebaha PL.**
- **Waxa aan ku dadaalayaa khafiifinta xeerarka canshuuraha kala duwan ee PL ee soo dajinta badeecadaha iyo dhoofintooda, aniga oo taas ula dan leh in ganacsatada yaryari ay helaan fursad ay kula soo dagaan kuna dhoofiyaan badeeco qiimo yar ugu fadhida, kadibna ay ka helaan faa'ido xoog leh. Meelmarinta khafiifinta canshuuruuhu waxa uu fursad siinayaan ganacsato iyo dhallinyaro dhaqaale ahaan tabar yar, waxa uuna PL u fududaynayaa in ay hesho lacag adag oo banaanka uga timaadda (Hard Currency).**



SAID SADIK ABDULLAHI
MUSHARAX XILDHIBAAN BAARLAMAANKA PUNTLAND



Ajandahayga Dawladda Puntland



Aqalka Isimada: Marjac siyaasadeed oo sharciyaysan.

Markii aan arkay kaalinta buuxda ee ay isimadu ku lahaayeen aasaaska Puntland, markii aan arkay saamaynta ay ku leeyihii siyaasadda PL xilliyada adag, markii aan eegay dhaqanka Soomaalida, ee waliba kusii wayn reer PL, kaas oo marar badan ina tusaya in ay dadka reer PL metalaaddooda ugu wayn ay tahay isimada, go'aankooda ugu dambeeyana ay isimadu meel mariyan, markii aan arkay in dawladaha caalamku kala sharci iyo dastuur duwan yihiin, qolo walbana ku dhaqanto xeerar iyo qawaaniin waafaqaya oo ku haboon qaab dhismeedka bulshadooda dhaqan ahaan, taariikh ahaan, iyo diin ahaanba, markii aan sameeyay ra'yi ururin kala duwan, markii aan la tashaday khuburo siyaasadeed, khuburo dhaqan, khuburo taariikheed, iyo kuwo ku takhasusay sharciga.

Waxaa iisoo baxday aragti oranaysa; in hab u socodka dawladeed ee PL, iyo qaab dhismeedka beeleysan ee bulshada ku dhaqan dawladda PL, ayna ka maarmayn isla falgal siyaasadeed oo sharciyeysan. Waxaa iisoo baxday aragti qeexaysa in ay lagama maarmaan tahay in golaha sharci dajinta PL uu ku biiro aqal sare oo gole u ah isimada PL.

Xalka siyaasadeed ee uu keenayo aqalka isimada.

- Aqalka isimadu waxa uu gole u noqonayaa dhammaan isimada beelaha daga PL, waxa uu noqonayaa goob u sharciyaysan isimada oo ay ku gorfeeyaan doorkooda uu dastuurka dawladda PL u ogolaan doono.
- Wixa uu noqonayaa aqal marjac u ah siyaasiyiinta PL ee kala aragtiyaha duwan. Waxaa yaraan doona is qabqabsiga siyaasadeed oo mararka qaarkood colaado huriya, kaas oo marar badan ay dadka reer PL dhaqaale ahaan iyo naf ahaanba ku khasaareen.



SAID SADIK ABDULLAHI
MUSHARAX XILDHIBAAN BAARLAMAANKA PUNTLAND



- Waxa uu fududenaya hub ka dhigista beelaha. PL waxaa marar badan ka dhacay dagaal beeleydyo dhiig badani uu ku daatay, waxaa dhiig daadashadaas fududeeyay in beel walba ay si iskeed ah u hubaysan tahay, in beel kasta ay si iskeed ah u hubaysan tahayna waxaa ugu wacan kalsooni darro ka dhex jirta beelaha PL wada dagan, siyaasiyiin kala aragtiyo duwan, iyo aqal baarlamaan oo bulshadii ay matalayeen iyo iyaga kalsooni badani dhex oollin.

Xubin kasta oo isin ahi waxa uu hub ka dhigis ku samaynaya beesha uu ku matalo golaha, waxa uuna ku wareejinaya dawladda PL. Sidoo kale isimadu waxa ay cod iyo maamul ku yeelanayaan hubka beeluhu gacanta u galiyeen dawladda, iyada oo lasoo koobayo awoodda ay golaha fulintu ku leeyihii isticmaalka hubka, si loo ilaaliyo kalitalis isla hubkoodii ku gumaada beelo ay isimadu u gardo-duubeen.

Gudashada waajibaadkayga dastuuriga ah;

- Waxa aan dadaal badan galinaya la dagaalanka musuqa hanti iyo awoodeed. Waxa aan ilaalinaya canshuuraha iyo hantida bulshada aan matalayo, isla markaasna aan ka hor istaagaya faquuq, ku takri fal awoodeed, iyo xaq duudsiin kasta oo uga imaan karta dawladda. Waxa aan si hufan ula xisaabtamayaa dhammaan golaha fulinta heerarkooda kala duwan ee maamula dhaqaalaha iyo awoodda dalka.

Waxa aan ku dadaalayaa in habsami u socodka dawladeed ee dalku uu noqdo mid shacabka aan metelayo ay raalli ku yihiin, isla markaasna aysan dano shakhs ahaaneed iga hor istaagin meel marinta aragtida shacabka aan metelayo ee isoo doortay.

➤ Fulinta sharciyada;

Puntland waxaa u dhamaystiran shuruucdii loogu talagalay in ay dawladi yeelato, sidoo kale waxaa dhisan hay'adihii meel marin lahaa shurcuudaas. Balse waxaa maqan fulinta sharciga, iyada oo sharciga ay ka awood badan yihiin shakhsiyaa gaar ah. Waxa aan ku dadaalayaa oo aan u tafo-xaydanaya in sharcigu noqdo mid shaqeeya, oo qof walba, maqaam kasta ha joogee, uu noqdo mid sharci lagu fulin karo. Waa meesha ka saarayaa dhaqanka gurracan ee ah in dadka tabarta yar oo keliya sharcigu qabto, kuwa tunka waynina ay lama taabtaan yihiin.



SAID SADIK ABDULLAHI
MUSHARAX XILDHIBAAN BAARLAMAANKA PUNTLAND





Talo loo dhamaystiran yahay;

- **Waxa aan ku dadaalayaa in aan noqdo mid albaabadiisu u furan yihiin bulshada uu matalo, isla markaana aan noqon mid maalinta la doorto ay ugu dambayso deegaan doorashadiisa, marka xigta ee uu xil doonka yahayna dib usoo milicsada.**
- **Waxa aan noqonayaa mid go'aamada xasaasiga ah aan si iskiis ah u qaadan, isla markaasna go'aanka deegaanka aan metelayo kala tashta qaybaha kala duwan ee bulshada.**
- **Midnimo; Puntland waxaa maanta ka taagan tafaraaruq bulsho, kaas oo beelaha PL wada dhistay qaarkood go'een, qaarkoodna ay hadda wadada ugu jiraan in ay maamulo gaar ah samaystaan. Waxaa taas kalifaya qanaacad la'aanta ay bulshadaasi ku qabto nidaamka maamul ee PL kajira, in dhagaha laga furaystay oo doodii ay baahiyahooda kusoo bandhigi lahaayeen laga dhagaysan waayay, iyo in koox gaar ah ay sidii ay doonto u maamulato dawladda PL. Waxa aan ku dadaalayaa qancinta dadka reer PL meel kqsta oo ay joogaan, dhagaysigooda, iyo soo bandhigidda baahiyahooda, aniga oo sida ugu dadaal badan u matali doona cid walba oo maamulka aan ka tirsanahay wax ka tabanaysa.**

✓ Xal u helidda khilaafka soo noq-noqday ee DFS iyo PL;

Mudo ka badan hal qarni oo kasoo bilaabata xilligii gumaystuhu imaanayay dalka, ilaa iyo maanta, dadka reer PL waxa ay u adeegayeen gobonimada, waynaynta, iyo jiritaanka Soomaaliyeed. Waxa ay naf iyo maalba u hureen Soomaaliya iyo Soomaalinimada, taas oo ku kaliftay in danahooda gaarka ah ay mar walba dayacnaadaan.

Waxa aan dhisayaa siyaasad cusub oo ka duwan siyaasadda ay reer PL ku dhaqmayeen qarnigii ugu dambeeyay, siyaasadaas oo ah in loo jihaysto danta PL iyo sidii ay horay ugu socon lahayd, iyada oo aan la dhibaataynayn Soomaalida kale. Waxa aan xardhaya siyaasad danta PL ka horreysiinaysa danaha kale oo dhan, taas oo xoogga saaraysa in PL ay aayaheeda u tashato, si kasta oo ay horay ugu socon kartana ugu socoto. Siyaasadaasi waxa ay salka ku haysaa in bulsha reer PL oo dhul ahaan, dad ahaan, iyo maamul ahaanba u dhamaystiran, ayna u xanibnaan mushkilad Soomaaliyeed oo ayna iyagu qayb ka ahayn.

Musharax Xildhibaan
Baarlamaanka Puntland

Siciid Sadiq Cabdullahi
(Siciid Codey)

+252907628585

musharrax@siciidcodey.com



@SICIIDCODEY



Galkaio, Mudug, Puntland



www.siciidcodey.com